




ICPAC
IGAD Climate Prediction
& Applications Centre


Gobolada Bari iyo Nugaal, Puntland

Odorasaynta cimilada oo ku
saleysan bilaha Oktoobar-
Nofeembar-Diisambar (OND)
2020



DORASAYNTA OKTOOBAR-NOFEEMBAR-DIISAMBAR (OND) 2020

- Saadaasha roobka xiliga deyrta ee bilaha Octoobar ilaa Diseembar ayaa ah mid caadi ah guud ahaan.
- Bilowga roobka ayaa la filayaa inta u dhexeysa 1-da ilaa 21-ka Octoobar, gaar ahaan Qardho, Bandar Beyla & Iskushuban oo ka tirsan Bari & Nugaal.
- Balse waxaa jira dib u dhac ku imaan doona roobabka oo ku beegan inta u dhexeysa Octoobar 31-ka ilaa Novembar 19-keeda, oo saameyn ku yeelan doona Boosaaso, Qandala & Calalwa oo hoos yimaada gobolka Bari.
- Saadaashu waxay il gaar ah ku eegi doontaa duufaanaaha dhici kara xiliga deyrta si dadka looga digo saameyntooda.



TALO BIXINO KU AADDAN WAAXYADA



BEERAHA

- Dawladaha hoose waxaa lagu talinayaa in ay gacan ku siiyaan beeraleyda (Sida bacrimin, iniinta) si ay ugu sahlaanaato tacabka beeraha;
- Beeraleyda waxaa lagu diirigalinayaa in ay xili hore u tababusheystaan falashada beeraha
- Beeraleyda waa in ay xiriir la yeeshaan hay'adaha beeraha, oo ay beertaan dalaga mudada yar ku baxa; sida galeyda, haruurka & dalaga u adkeysan og abaarta;

BARI IYO NUGAAL, PUNTLAND

Talo bixinno ku saabsan cimilada ee bilaha Oktoobar-Nofeembar-Diisambar (OND) 2020



- Beeraleyda waxaa lagu boorinayaa in ay la tashadaan wasaaradaha qaabilsan horumarinta beeraha marka ay timaado maareynta cayayaanka inta lagu jiro xiliga abuurka;
- Beeraleyda iyo bulshada waxaa lagula talinayaa in la xiriiraan dawladaha hoose si ay u daryeelaan biyaha iyo carada, iskana weeciyaan fatahaadaha, hagaajiyaan kanaalada iyo waro biyoodka;
- Beeraleyda waa in ay kobciyaan keyda iyo maqaasiinta;
- Beeraleyda waa in iska jiraan aafada ayaxa oo ay wargeliyaan dawladaha hoose iyo hay'adaha horumarinta si ay tilaabo uga qaadaan.

XOOLAHA

- Beeraleyda waa in ay abuurtaan dhirta daaqa u ah xoolaha oo waari karta, cowska, keyd fiicanna dhigtaan xili roobaadka;
- Xoola-dhaqatada waxaa lagu wargelinayaa in ay xiriiri la sameystaan wasaaradda xannaanada xoolaha si loo xaqiijiyo maareynta cudurada xoolaha ku dhaca, oo ay ku keydsadaan dawo ku filan, sida kuwa gooryaanka, sambabka iyo talaalka;
- Wasaaradaha Beeraha, Xannaanada Xoolaha, Biyaha waxaa lagu boorinayaa in ay dayactiraan goobaha ay xoolaha u soo arooraan sida ceelasha, waraha, berkadaha si xoolaha ay u helaan waraab ku filan;
- Xoola-dhaqatada waxaa lagu dhiirigalinayaa in ay daryeelaan dhulka daaqa xoolaha oo ay marba meel u soofiyaan xoolaha si dhulka daaqsinka leh aan loo xaalufin;
- Wasaaradaha Arrimaha Gudaha, Amniga & Cadaalada waa in ay gacan ku siiyaan reer miyiga tababarka iyo xalinta qilaafaadka.



ARAR MUHIIM AH

- Macluumaadkan waxay salka ku hayaan saadaasha xiliyada Octoobar ilaa Diseembar oo ay soo saartay Wasaaradda Bey'ada, Beeraha iyo Isbadalka Cimilada ee Puntland.
- Saadaashan waxay tilmaameysaa duruufaha jira iyo arrimaha kale ee dhici kara ama aan dhici karin ee la xiriira odoraska roobabka.
- Bulashada waxaa lagu boorinayaa in ay la socdaan macluumaadka soo kordhaya ee 10-kii maalmoodba mar soo baxa iyo kuwa billaha ee Wasaaradda Bey'ada, Beeraha iyo Isbadalka Cimilada ee Puntland.
- Saadaashan waxay kaloo cuskan tahay waxyaabaha cimilada la xiriira ee dhici kara mararka qaar, taas oo loo baahan yahay in qorshaha lagu daro hadii uu isbadal yimaado.
- Macluumaadkan waa in loo adeegsadaa waaxyaha ay quseeyaan iyadoo ay la jirto saadaasha ay soo saarto Wasaaradda Bey'ada, Beeraha iyo Isbadalka Cimilada ee Puntland.

Faahfaahin dheeraad ah, fadlan kala xiriir:

Agaasimaha Saadaasha Cimilada,
Wasaaradda Bey'ada, Beeraha iyo Isbadalka Cimilada ee
Puntland,
TELEPHONE: +252907794837 & + 252907758975
E-MAIL: fiidow10@gmail.com & liihartaa@gmail.com

